WARMURTIYEEDKA KULANKA WASIIRRADA MAALIYADDA DOWLADDA FEDERAALKA, DOWLADAHA XUBNAHA KA AH DOWLADDA FEDERAALKA IYO MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR

Kulanka 25aad

Taariikh: 19 Nofeember 2026
Goobta: LANA Hotel, Muqdisho – Soomaaliya

Arar

Kulan ay isugu yimaadeen Wasiirrada Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDFS) iyo Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) ayaa si guul ah uga qabsoomay Hotel LANA ee magaalada Muqdisho, taariikhdu markay ahayd 18-19-ka Nofeember 2026. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray arrimo hortabin u leh kobcinta nidaamyada maaliyadeed iyo mideynta iyo sare u qaadidda dadaallada wada-shaqayneed ee labada heer dowladeed.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay una shir-guddoomiyey Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo ay goobjoog ka ahaayeen Wasiirrada Maaliyadda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Xisaabiyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiye ku-xigeenka Maamulka iyo Maaliyadda ee Gobolka Banaadir, xubno Guddiga Farsamada (IGFFTC) ah, Isu-duwaha Mashruuca RCRF iyo Xoghaynta Guud ee IGFF.

Kulanku wuxuu bogaadiyey muhiimadda iskaashi joogtada ah ee labada heer wasaaradeed, isagoo hoosta ka xarriiqay in sii xoojinta wada-shaqayntaas ay lama huraan u tahay hirgelinta heshiisyadii hore loogu gaaray iyo guud ahaan kuwa hortabinta u leh federaleynta maaliyadeed ee dalka. Sidoo kale, kulanku wuxuu mar kale dib u adkeeyey mowqifkiisa ku aaddan xaqiijinta midnimada dalka, iyo hirgelinta isla-xisaabtan ku dhisan kalsooni iyo is-qancin.

Qodobada masiiriga ah ee kulanka lagu lafa-guray, go'aanna laga soo saaray waxaa ka mid kuwa soo socda:

1. Soo bandhigidda natiijooyinka iyo warbixinada is qiimeyntii 4aad ee DXDF ee xadaynaya barnaamijka qoondada kabka miisaaniyadda dalka
2. Dhammaystirka qabyo-qoraalka heshiiska hirgelinta canshuurta iibka mideysan ee heer DXDF
3. Warbixin siyaasadda nidaaminta iyo hay'adaynta shaqada guddiga maaliyadda ee dalka, (Intergovernmental Fiscal Federalism Policy Framework and Governance Arrangement)
4. Soo jeedin warbixin ku aadan ambaqaadidda waxqabadka Guddiga fadaraalaynta iyo Madasha Wasiirada Maaliyadda ee tobankii sano la soo dhaafay
5. Go'aan ka gaaris qoondada kabka miisaaniyadda Dowlad Goboleedyada ee mashruuca RCRF, sanadka 2027

Go'aannada shirka lagu gaaray oo faahfaahsan waa sida soo socota:

1) Soo bandhigidda natiijooyinka iyo warbixinnada is-qiimeyntii 4aad ee DXDF ee xadaynaya barnaamijka qoondada kabka miisaaniyadda dalka

Waxaa kulanka lagu soo bandhigay natiijooyinka is-qiimeyntii 4aad ee Dowlad-Goboleedyada iyo Gobolka Banaadir (DXDF/BRA), iyadoo la faahfaahiyey darajada iyo kaalinta maamul kasta kaga jiro jadwalka qiimeynta. Natiijooyinka waxaa hubiyay oo xaqiijiyay Xoghaynta ka dib markii maamulladu ay soo gudbiyeen. Kulanku wuxuu ka dooday natiijooyinka la soo bandhigay, ugu dambeyntiina wuxuu ansixiyey warbixinta iyo natiijooyinka Isqiimeynta. Natiijada is-qiimayntaan ayaa xadidaysa qoondada kabka miisaaniyadda dalka.

2) Dhammaystirka qabyo-qoraalka heshiiska hirgelinta canshuurta gadista mideysan ee heer DXDF

Kulanka Wasiirada waxaa sidoo kale lagu soo bandhigay qabyo qoraalka Heshiiska hirgelinta Canshuurta libka Mideysan ee heer DXDF/MGB, iyadoo la faahfaahiyey ujeeddada heshiiska, habraaca hirgelintiisa iyo doorka maamulladu ku leeyihiin xaqiijinta nidaam canshuureed oo mideysan. Kulanku wuxuu si qoto dheer uga dooday qodobada heshiiska isagoo ugu dambeyn mabda'ahaan meel mariyay dhammaystirka iyo hirgelinta mideynta canshuurta gadista oo danabaysan. Waxaa la isla qaatay in ay dhaqangasho kowda Janaayo 2027, hawlaha farsamo ee dhiman in la dhammaystiro ka hor muddada sare ku xusan.

3) Warbixinta siyaasadda nidaaminta iyo hay'adaynta shaqada guddiga maaliyadda ee dalka, (Intergovernmental Fiscal Federalism Policy Framework and Governance Arrangement)

Kulanka waxaa lagu soo bandhigay warbixin ku aadan siyaasad nidaaminaysa habka shaqo ee guddiga fadaraalaynta dalka. Siyaasaddaan oo faahfaahinaysa waajibaadka shaqo, habraaca kulamada, gaarista go'aannada iyo sii joogtaynta wada-xaajoodka arrimaha maaliyadda dalka ayaa si wada jir ah looga heshiiyay in la sharciyeeyo, si rasmi ahna loo soo saaro. Qormo siyaasadeedkaan ayaa loo gudbin doonaa Golaha Wasiirada si loo ansixiyo loona dhaqan-galiyo.

4) Soo jeedin warbixin ku aadan ambaqaadidda waxqabadka Guddiga fadaraalaynta iyo Madasha Wasiirada Maaliyadda tobankii sano ee la soo dhaafay

Shaqada Guddiga fadaraalaynta maaliyadda dalka waa ay toban sano jirsatay. Sidaas darteed, kulanka waxaa lagu soo bandhigay warbixin ku saabsan habraaca ambaqaadidda dib-u-eegista waxqabadka Guddiga Farsamada (IGFF-TC) iyo Madasha Wasiirrada Maaliyadda (FMFF) tobankii sano ee la soo dhaafay. Warbixintan ayaa eegaysa waxqabadka guddiga, caqabadihii lala kulamay, arrimaha lagu kala aragti duwanyahay, diiwangalinaysa heshiisyadii waa waynaa ee la gaaray. Warbixinta dib-u-eegista waxaa lagu soo bandhigayaa kulamada soo socda ee madasha.

Kulanku wuxuu bogaadiyey horumarka iyo guulaha laga gaaray muddadaas, wuxuuna soo jeediyey in la sameeyo dib u eegis madax bannaan oo faahfaahinaysa shaqadii la soo qabtay si warbixin dhammaystiran looga soo saaro.

5) Go'aan ka gaaris qoondada kabka miisaaniyadda Dowlad Goboleedyada ee mashruuca RCRF, sanadka 2027

Qoondada Mashruuca RCRF ee kabka miisaaniyadda Dowlad Goboleedyada sanadka 2027 dood dheer ayaa laga yeeshay, iyadoo la dul istaagay habka wax qaybsiga. Kulanka wuxuu mabda'iyan go'aamiyay in qaybsiga had-iyo-goor ku salaysnaado is-qancin, sinnaan ku qotonta baahiyaha daruuriga ah. Waxaa la go'aamiyay in qoondada sanadka 2027 ee dowlad Goboleedyada lagu saleeyo sida soo socota:

5.1) In marka hore Dowlad Goboleedyada muhimmad gaar ah siiyaan hagaajinta iyo sare u qaadidda dakhliga gudaha, si ay u daboolaan baahida kharashaadka daruuriga ah sida mushaharka, IWM;

5.2) In marka hore maamuladu si siman u wadaagaan qoondada kabka miisaaniyadda RCRF ee 2027;

5.3) In Dowlad Goboleed walba ku dadaasho xaqiijinta iyo fulinta shuruudaha isticmaalka qoondada;

5.4) Haddii ay dowlad goboleed buuxin waydo shuruudaha isticmaalka qoondada RCRF, haraaga qoondo, dib ayaa loogu qaybinayaa dowlad goboleedyada dhammaantood si siman;

5.5) Madashu waxay isku raacday in Dowladda Waqooyi Bari (WBS) iyo Maamulka Gobolbka Banaadir (BRA) si degdeg ah loogu sameeyo qiimeynta diyaarsanaanta (readiness assessment) iyadoo lala kaashanayo Bankiga Adduunka, si loo qiimeeyo buuxinta shuruudaha ka qaybgalka mashaariicda horumarineed, lana dardargaliyo kamid noqoshada ka faa'ideystayaasha mashaariicda.

Madashu waxay bogaadisay dadaallada dhaqan-galinta xeerka caalamiga ah ee xisaabaadka Dowladda, (IPSAS) ee uu hormuudka ka yahay Xafiisak Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

Madashu waxay dhiirigalisay dhammaystirka geedi socodka nidaamka xeerka caalamiga ee xisaabaadka IPSAS.

Gunaanad

Wasiirada Maaliyadda Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxay mar kale adkeeyeen sida ay uga go'an tahay xoojinta wada-shaqeynta maaliyadeed, hirgelinta heshiisyada la gaaray iyo dardargelinta dib-u-habeynta maaliyadeed ee dalka, si loo gaaro horumar waara iyo koboc dhaqaale oo loo dhan yahay.

Wabillaahi Towfiiq

Saxiixayaasha Warmurtiyeedka Shirka:

1. Ciise Maxamud Guure, Guddomiye Kuxigeenka Maamulka iyo Maaliyadda Gobalka Banaadir _____
2. Sen. Farxaan Cali Maxamuud, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug _____
3. Eng. Xuseen Maxamed Xaaji Xasan, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda K. Galbeed _____
4. Maxamed Faarax Maxamuud, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Puntland _____

5. Axmed Cabdirasaaq Maxamed, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Jubbaland_____

6. Cabdiraxiim Ciise Caddow, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Hirshabeelle_____

7. Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Waqooyi Bari _____

_____

Xildh. Biixi Iimaan Cige
Wasiirka Maaliyadda DFS